# MUSIIBADA RUKUNADA XUKUN OO LA SIIBO

Maan is weydiino; “oo kaalay haddii keligii-taliyihii Soomaaliya laga tuuray xukunkii bilowgii 1991 kii muxuu dalkii u degi la’yahay oo dawlada dambe loo dhisi la’yahay ilaa hadda oo laga joogo 15 sano iyo dheeraad. Sow ma ahan mudadani intii u qof dhashaa ku qaangaaro oo wax walba ay meeshii loogu tala galay ku gaari karaan”?
Is weydiinta su’aashaan ayaa iska badan oo sooctay mudadaas dheer ee aan kor ku soo xusnay laakiin jawaab siinteeda weli looma dhaadhicin. Hadaanse isku dayo waxay tahay sida soo socota:
Haddaan tusaale usoo qaadano aqal Soomaaligeenii (hoorri) ka samaysnaa qalabyada ay ka midka yihiin: raro ama duful, dhigo, xargo, mayrax, udub dhinacyeed, udub dhexaad ama tiir, daahyo iyo waxyaalo kale oo lagu shaqlo. Ka dhig inay raaradii iyo dhigihii duqoobeen oo roobkii iyo qoraxdii toona celin waayeen, maxaad samayn? Ma aqalka oo dhan baad udub dhexadaka usiibin mise dhigtii ama raarkii bololay baad ka qaadin oo mid kale oo cusub ku badelin?. Run ahaantii waan wada dareemi karnaa in marka la yiraahdo aqalka oo dhan ha la isku dumiyo oo udu dhexaadka iyo tiirarka kaleba caynka ha loo gooyo ay halkaa ku burburayaan dhamaan qaybihii kale ee aqalka ee horey u bed qabay. Ka sii darane sidee u malaun kartaa in aqalkaas dib loogu dhisi karo. Waxay ila tahay waa in aqlakaas dib loogu raadsho dhamaanba agabkii uu ubaahnaa oo nooc walba leh. Ka sokow waa in xataa godadkii ay tiirarku ku jireen dib loo qodaa oo laga soo siib siibaa burburkii tiirarkii hore ee ku jabay. Hadaba hadaan taas la barbar dhigno in guri cusub la yagleelo keebaa dhib badnaanaya keebaase sahlanaanaya? Waxay ila tahay in ay sahlantahay in guri hor leh la dhisto oo markaa ka dib ay gabdhuhu soo tolaan raaro -dufulo iyo dhigo cusub.
Aan usoo dhaadhaco ujeedada qormadee, ololihii balaarnaa ee lagu qaaday duminta dawladii ka jirtay Soomaaliya waxay maanta na baraysaa suurta gal la’aanta dawlad dambe oo Soomaaliya laga dhiso, iskaba daa in ay na soo fariisisay guri hoog iyo ba’.
Haddaba waxaan dareemi karnaa in wax walba ay ku fiican yihiin kuna bad baadi karaan dib u habayn iyo naashnaashid ee aysan badel sal gooyo ah wax ku hagaagi karin.
Marka aan aragtidaas ah wax walba hadii gunta laga jaro dib uma soo baxaan oo waa sida geed beereedyada miraha uun laga gurto iyadoon la jarin ama laamaha kore laga qaado

guntana loo reebo sida: geed cambaha, qasabka, iwm, ku eegno muraayada taariikhda waxaa noo soo baxaya dhawr bog oo kugu wada reebaya murugo iyo ciil, aadna is leedahay malaha duulkaan diin iyo dal la wadaagaa dersiba ma qaataan ee god abeesa kun jeer laga wada qaniinaa.

Taariikhud waxay na tusinaysaa in markii laga adkaaday khaliifadii Islaamka ee ugu dambaysay ay dhacday in gunta laga jaray oo gebi ahaanba la suuliyey, taasina waxay maanta kaliftay in markii ay Muslimiin badani soo baraarugeen oo midba geeskiisa ka kacay uu dadaalkoodii ku dhamaanayo hal bacaad lagu lisay. Waxaa iska soo daba toosaya shakhsiyaad aan isu dhaweyn kalana war qaadan karin sidaa darteed mid walba halkiisa lagu deminayo intuusan soo ifin. Haddaba ka waran hadii maalintii khaliifada la riday lagu wada dadaali lahaa in la sii samaysto udub dhexaad waagii la awoodo la isugu soo aruuro oo ugu yaraan mabaadii'da khaliifadu ay magac ahaan isaga sii jiri lahayd?.

Bal aan taas la garab dhigno khaliifadii masiixiyada ee kaniisadda Katooliga. Kaniisadani markay waajahday colaado iyo ka horimaadyo fara badan ayna dareentay inay dhacayso ayey iska caleemo saarteen shakhsi ka mid ah ayna ku magacawdeen Boob (wuxuu doonaba ha boobee) ama baadari oo macnihiisu yahay “Aabbe”. Bal eeg maanta kaniisadani waxay adduunka ugu faanaysaa inay haysato maamul dhexe oo uu madaxweynahooda iyo askarigooduba ka wada amar qaataan.

Masalkaan marka aan ku eegno muraayada agabka asaasiga ah ee ay aadanuhu ubaahan yihiin maalin walba, bal aan eegno burburka gaaray magaalada Muqdisha. Ka soo qaad inaad hada joogto Muqdisho ood ku lahayd guri weyn oo qaali ah bartamahii ama faras magaalhii Shabeele iyo Shangaani, bal xisabtan oo teebaa kuu kharash iyo shido yar inaad hada ka bacdi guri ka dhisato fooraha fog ee magaalada sida Ceel cirfiid, iwm, iyo inaad dib u dhisato gurigaagii kaaga burburay aagaas? Waa hubaal in uu dhismaha guri cusubi kuu sahlan yahay marka laga eego dhinacyo badan. Laakiin hadan ka soo qaad inaad adigu ka mid ahayd ragii ka dambeeyey burburkii dalka ood kharashkaaga ku soo bixisay sidii xukunkii loo ridi lahaa?.

Si kale hadaan u qorno, ka waran hadaad adiga oo gurigaa weyn uu kuugu yiilay Shabeelle aad karaahiyeysato qaab dhismeedka gurigaagaas miyaad hal mar ah iska wada dumin lahayd gurigaas adiga oo aan ogeyn halka aad ku hoyanayso habeenka aad dumiso oo wax guri kale ihi uusan kuu diyaarsanayn? Taasi waa masalka dawladii la dumiyey.

Haddaba ogow inaan laantaan saarneyn gunta ka goynay dhulkana aanu naalo. Ilaahow faraj kheyr noo fur.

**Wasalam**

**Dr. Qasim Hersi Farah**

**Murashaxii hore ee Madaxweynenimo**